Noqo Mufakir Free Book pdf 2018

NOQO MUFAKIR

U FIKIR SI XORA

Is ahow adigu

Is aqoonso oo

Waxad aamintaa

Inaad tahay Qof Jira



Qore: Mohamed Ahmed Elmi

Waayeele



" Waalidu waa marka aad Qof kula yaabto shay Adiga kuu Caado ah"


— Mufakir Waayeele


" Ogoow Jahliga dunidu keliya
maaha Aqoon la'aanta sidoo kalena
Waa ku Guul-dareysiga Jaceylka"
— Mufakir Waayeele


" Haddii aanad sawiran karin waxa
aad rabto inaad Xaqiijiso dhadhan
badan kuu sameyn mayso Xataa
haddii aad Xaqiijiso"



©Addison
"Yaysan ku galin kalsooni ama yididiilo badan goortii qof ku yidhaahdo WAAN KU JECELAHAY! Su'aasha saxda ah waxa weeye ILAA GOORMA? sababtoo ah sida Xilliyada sanadku isku bed-bedelayaan ayay Dadkuna isu badelaan"



"Jaceylku waxba maaha hadaan Ficil la socon , Aaminaadu waxba maaha hadaysan Cadeyn la socon, Raaligelintu waxba maaha haddii aan isbadel jirin"



"Dadka qaarkood ma rabaan inay
Runta maqlaan sababtoo ah ma
doonayaan in Dhalanteedkooda la
Burburiyo"



" Ma jiro qof weli faqiir lu
noqday wax uu bixiyey
awgii"
Anne frank


" Noloshu kuma qasbana inay ina siiso waxa aynu filayno"
Margaret mitchell



" Noloshu waxay Qiimeysaa qofka marka hore Nafsadiisa Qiimeeya"
Ayuub yusuf sakiin


" Marka aad cadhaysan tahay Aamus"
Imaamu bukhaari


" Waligaa ha samayn wax aanu damiirkaagu ogolayn xataa haddii duruufta iyo mawqifka aad joogtaa kugu khasbaayaan"
Albert Einstein





" Badel fikirkaaga si ficilkaagu
isu badelo Natiijaduna isu
badesho"





" Raggu been way sheegaan laakiin been uma ooyaan, Dumarkuna been ma sheegaan laakiin been way u ooyaan"

FAYSA


" Dhamaantoodba waxay maqlayaan
Hadalkayga adiguna keligaa waxaad
maqlaysaa Qalbigayga Ilaahoow"



" Kalsoonidu waa u badheedhida
Khatarta"
— Mufakir Waayeele


" Waxay noloshu i bartay in Qanaacadu tahay furaha xasiloonida"
— Mufakir Waayeele
" Xooga iyo muquuninta waxa xiiseeya Ragga intooda akhlaaqda xun"
Albert einstein



" Waad u qalantaa inaan
Qalbigayga kusiiyo laakiin Nasiib
darro waa lagaaga soo Horeeyey
waxaan ku siiyo ma hayo"


" Adduunku qofka wax uma dooro
se wuxuu siiyaa wixii uu qofku ka
doorto kana Doonto"


" Ha isku wayneyn nolosha
Farxadaada uun ka dhex Raadso,
Halkaad ka weydo ka baydh
Halkaad ka heshana ku sugnow"





" Ma jirayo shay adiga kugu
adkaanaya Marka Uu Alle swc
Garabkaaga yahay"


" Qofka aan waxba akhriyin
Nolosha uma arko si waadix ah"


" Hadaad ninkaaga ugu ciyaarto sida Kubada gabadh kale ayaa u qaban doonta sida Gool-hayaha"
" Isbedelku inaga ayuu inagu xidhan yahay se kuma xidhna Dadka inagu xeeran"
Idiris tooxyare


" Isbedelku inaga ayuu inagu xidhan yahay se kuma xidhna Dadka inagu xeeran"
Idiris tooxyare
" Maaha inuu waxyaabaha muhiimka ahi ay marna marti u noqdaan waxyaabaha aan muhiimka ahayn"
John wolfgang



" Kal-kaaliyayaasha cabsidu
waa walaac go'aan la'aan iyo
shaki"

" Haddii jaahilku aamusi lahaa Dadkuba isma maan-dhaafeen"

Cali bin abi dalib

" Ileyska iyo ilbaxnimada noloshu waa Wax akhriska"

— Mufakir Waayeele



" Waligaa haka xidhin
Afkaaga qof aad mar hore u
furtay Laabtaada"

Charles dickens







" Markasta oo aad aragto qof ku neceb amma kuu cadhoonaya u Qosol si uu u dareemo Awoodaada"




" Hadaad ka maqan tahay Fagaaraha Hal-ganka ha dhowrin inaad ka muuqato Fagaaraha Guusha"


UNKNOWN


" Sharafta adduunyo waa maalka
Sharafta Aakhirana waa Camalka
suuban"
Cumar bin khadaab


" Xoriyadu maaha wax walba
yeel"




" Guushu maaha wax bilaabid ee waa Dhamaystirka hawshii aad Bilowday"



" Horumarku suuragal maaha isbadel la'aan, Kuwa aan awooddin inay cuquushooda badalaan ma awooddaan inay wax kale badalaan"


Barma arid shawa



" Suuragal uma aha qofku inuu
shaqo si isdaba jooga u qabto
Haddii aanu camalkaasi
waafaqsanayn Aragtidiisa"



" Wakhtiga oo la beer-dareeya
wuxuu ka daran yahay
Geerida"



" Ficil la'aantu waxay
kordhisaa shakiga iyo cabsida,
Ficilkuna waxa uu kordhiyaa
Dhiiranaanta iyo kalsoonida"


" Derajadu maaha sharaf
iyo awood kuu siyaaday ee
waa Masuulliyad soo
korortay"



" Waxa aan jecelahay
inaan wax barto oo aan
Cid kasta wax ka barto"
Ibraahim Al-fiqi
" Ma jirto mushkilad aan
lahay meel Wanaagsan"


" Umadaha horumaraa waa umadaha waxakhriya"
Ayuub yusuf sakiin



" Ceeb maaha inaad dhacdid waxa ceeb ah in aad dib usoo Kici waydo"
Maxamed Cali Kalaay



"Anigu kuuguma Cadhaysani
inaad been ii sheegto balse
waxaan ka cadhaysanahay
sida aan mar kale kuu
Rumaysan doono"



" Khayrka fisha waad heli
doontaane"
Suubanaha Scw



" Idinku dadka kuma deeqi kartaan Xoolihiina balse waxaad ku deeqi kartaan Dabeecad wanaagsan iyo weji furan"
Suubanaha SCW



" Shay walba wuxuu isbadelay markan si weyn u Fikiray"



" Gaadhitaanka guusja waxa saldhig u ah Kolba Fikirka gudahaaga ku jira Aaminaadiisu nooca ay tahay"
— Mufakir Waayeele



" Jahligu waa xididka sababa wax kasta oo Xun"


" Farxadu waxa ay ku xidhan tahay qaabka aad u Fikirto"



" Caqabaduhu nolosha kama dhamaadaan laakiin Xal lagu dhaafo ayaa jirta"



" Ma jiro Qof awood u leh in uu laba Tallaabo hal mar wada qaado, Waxa aad qaadi kartaa Hal tallaabo markiiba"
Osho



" Ardeygu maaha weel ay tahay in la Buuxiyo se waa Shumac ay tahay in la shido"
Albert Einstein


" Ciidan soo duulay waa la
iska difaaci karaa laakiinse
Fikir soo duulay lama Difaaci
karo"


" Ma jirto mushkilad
awoodaysa inay Waajahdo
fikirka Nidaamsan"


" Inta badan dadku way
fashilmaan maaha awood
darro balse waa iyaga oo aan
Joogteyn"
Zigziglar



" Noloshu maaha siday u
muuqato Laakiin waa waxaad
ka Aaminto"
— Mufakir Waayeele




" Hadaf la'aan waxaad noqon sida Dooni aan lahayn meel ay kusoo xidhato safarkeeduna ku dhamaado inay burburto oo Gobolo yar yar noqoto"

ZigZiglar






" Dhulka is dhig adiga oo sareeya, Sabir xikmad awgeed, Cadaalad samee adiga oo awood leh, Iska cafi adiga oo Aarsan kara"
" Saddexda shay ee lama huraanka u ah Hanashada wax kasta oo qiimo leh waa: Hawl-karnimo, adkaysi iyo Garaad fiican"
thomas A.Edison

" Laba sirood ayaa jaceylka lagu kobciyaa:
Markaad qaldan tahay Qiro
Markaad saxsan tahayna Aamus"




" Dadka guulaystaa waxay ku horumareen Waqtigii ay Dadka kale dayaceen oo ay dhawreen"


" Si aad u gaadho meesha aad
Doonayso waa inaad ka
tagtaa Meesha aad joogto"
" Ku mahadnaq waxa aad
maanta tahay una Halgan
waxa aad doonayso inaad
berito Noqoto"



" Wejiga walaalkaa oo aad Dhoollacadeysaa waa Sadaqo"
Suubanaha Scw



" Ha u adeegsan hadallo taagtaagan Hooyadaadii ku bartay Hadalkaba"
Cali bin abi daalib



" Guul aan Asalkeedii hore ahayn
mid soo martay Guul-darro taas
yaan la odhan waa Guul se magac
kale haloo Raadiyo"
— Mufakir Waayeele


" Quruxda keliya ee waarta
waa quruxda Qalbiga"
Jalaalu-diin Rumi



" Gafefka nacaska adsuunka oo dhan baa og laakiin isagu ma oga'Gafefka ninka caqliga badana isaga ayaa og laakiin adduunku ma oga"
Tallaabo Photography



" Guushu waa shaqo adag oo wadata halgan dhaba se maaha shay jilicsan oo si fudud loo gaadho"
— Mufakir Waayeele



" Cilmigu waa hanti
Darajaduna waa dadaal"
— Mufakir Waayeele


"Hooyadu waa Nolol ka dhamays
tiran dhinac kasta Rabbi ha sharfo
hana u naxariisto Hooyooyinkeena
Adduun iyo Aakhiraba"
— Mufakir Waayeele


" Haddii aanad samayn waxaad
jeceshahay waxaad lumisay
waqtigaaga"



" Dumarka oo dhan u tixgeli
sida hooyadaa se ha u aaminin
sida Hooyadaa"
— Mufakir Waayeele



" Keliya waqtiga adag ayaad ogaan kartaa saaxiibka dhabta ah"
— Mufakir Waayeele



" Murugo la'aan ma dareemi karno Qiimaha Farxada"
— Mufakir Waayeele


" Haddii aanad waxba akhriyin fadlan ha filanin inaad Guul gaadho"
— Mufakir Waayeele



" Saaxiibka wanaagsani wuxuu ka qaalisan yahay boorsooyin Dahab ah"
— Mufakir Waayeele



" Nadiifi qalbigaaga ka hor
intaanad nadiifin
jidhkaaga, Nadiifi carabkaaga
ka hor intanad nadiifin
Gacmahaaga, Wanaag ka filana
Dadka"


" Ka dheerow saaxiibtinimada
Dadka mar kasta Kula
falanqeeya Dadka kale
Ceebahooda"



"Aniga iyo Nasiibkaygu si wacan ayaanu isku naqaanaa, anigu waan aqaanaa inuu xun yahay. Isna wuu yaqaanaa in aanan iskuba halaynba"
"Haddii dumarku ay Ragga ka qurux badan yihiin lama sameeyen Make-up ka"
EYELINER
EYESHADOW
CARVING OUT
MASCARA
FOUNDATION & CONCEALER
CONTOUR & BLUSHER



"Maxay faa'ido leedahay hadaad ii baqaysid hadana aanad isku dayeynin inaad i Ilaashatid.
Maxay faa'ido leedahay hadaad i jeceshahay hadana aanad isku dayeynin inaad i Fahantid"
labada kalmadood ee adduunka ugu caansan:
- ILOVE YOU
- MADE IN CHINA
labaduba waa qaar aan laysku halayn karin.


" Qofka idhaahda waxaan
ahay Aqoonyahan Waa jaahil"
Cumar bin khadab



"Ha is yeeshaan hadalka aad
dadka u sheegayso, iyo ka ay
naftaadu kuugu sheekaysano"
Idiris toox yare


" Wakhtiyadda adag kuwa garabkeenna aan ka wayno uma baahnin marka aan farxadda la dabaal dagayno inay garabkeenna yimadaan"
Idiris toox yare


" " Dhibkastaba waxa ay leedahay xal ee waxa kala duwan sida aad u aragto dhibta ku haysata in aanay lahayn xal warraa"
Idiris toox yare


" Caddaaladdu waa waxa kaliya ee aad deeqsiin karto dadka iyo Adduun waynaha aan ku noolnahayba"
Idiris toox yare



" Noloshu waa tartan ee Ha moogaan"
Idiris toox yare


" Noloshu waxay ku bareysaa Jaceylka,
Waaya-aragnimaduna waxay ku
bareysaa Cidda aad jeceshahay,
Dhacdooyinka adagina waxay ku
barayaan cidda Adiga ku jecel"


" ha u dadaalin in aad hanti
baddan Adduunka ku yeelatid
se u dadaal in aad camal khayr
qabba u shaqaysatid si aad
janno u hesho"

Idiris toox yare


" Jaceylka ka dhexeeya
Lammaanaha ayaa Farxadna
ugu filan Ubadkooda"
— Mufakir Waayeele


" Haddii ay naftaadu kugu
maaweeliso Beenta waqtiga
ayaa ku Bari doona Runta"
— Mufakir Waayeele